## Casharka 7

1. Sidee bay dunidu ahayd ama lagu masaali karay ka hor intaanu Ilaah uumin?
-Bilowgii, ilays ma jirin.
-Bilowgii, waxaad unuda daboolay gudcur

2. Sidee baa Ilaah iftiinka u abuuray maalintii Kowaad?
-Ilaah wuxuu iftiinka ku uumay ama abuuray Hadalkiisa.

3. Sidee baa Ilaah cirka ku abuuray maalintii labaad?
-Ilaah wuxuu Samada ama cirka ku abuuray hadalkiisa.

4. Sidee baa Ilaah biyihii kaga fogeeyey ama dhaqaajiyey dhulka?
-Ilaah wuxuu qaar ka mnid ah biyihii dhulka daboolay geeyey samada.
-Ilaah biyihii kale wuxuu ku dhaafay dhulka.

5. Kumuu ahaa kii amray in biyihu dhulka gadaal uga soo baxaan, si dhul engegan meeshii dhexda ahyd uga soo boxo?
-Ilaah.

6. Muxuu Ilaah biyaha ugu amrayaa inay gadaal u soo noqdaan, oo biyuhuna u addeecayaan?
-Waayo Ilaah baa biyaha abuuray.

7. Sidee baa Ilaah ku abuuray dhirta iyo geedaha oo dhan?
-Ilaah wuxuu dhirta iyo geedaha ku abuuray Hadalkiisa.

8. Waa ayo qofkii Ilaah u abuuray dhirta iyo geedaha oo dhan?
-Ilaah wuxuu u abuuray dadka.



9. Muxuu Ilaah dhirta iyo geedaha oo dhan u beeray?
-Wuxuu u beeray waxay ahayd inuu dadka aad u jeclaa.

10. Sidee baa Ilaah ku abuuray qorraxda, dayaxa, iyo xiddigaha?
-Ilaah wuxuu ku uumay qorraxda, dayaxa, iyo xiddigahaba Hadalkiisa.

11. Sidee baa Ilaah ku abuuray kalluunka oo dhan iyo Haadda?
-Ilaah wuxuu kalluunka iyo Haadda oo dhan ku abuuray Hadalkiisa.

12. Waa ayo kii Ilaah u abuuray Kalluunka iyo haadda?
-Ilaah wuxuu u abuuray iyaga oo dhan Dadka.

13. Muxuu Ilaah u abuuray Kalluunka oo dhan iyo Hadda oo dhan?
-Waayo Ilaah aad buu u jecel yahay dadka.

14. Maxaa Ilaah ka yiri wixii uu uumay oo dhan?
-Ilaah wuxuu yiri, wax waliba way wanaagsanaayeen.

15. Maxaa Ilaah u awooday inuu wax waliba si kaamil ah u abuuro?
-Waayo Ilaah waa kaamil.

-Muxuu Ilaah abuuray maalintii lixaad?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:24-25

24-Oo Ilaah wuxuu yidhi, “Dhulku ha soo bixiyo uun nool oo caynkiisa dhala, kuwaasoo ah xoolo, iyo waxa gurguurta, iyo dugaagga dhulka oo caynkiisa dhala.” Sidaasayna ahaatay.

25-Ilaahna wxuu sameeyey dugaagga dhulka oo caynkiisa dhala, iyo xoolo caynkooda dhala, iyo wax kasta oo dhulka gurguurta oo caynkiisa dhala; Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay.

-Maalintii lixaad, Ilaah wuxuu abuuray xayawaanka oo dhan.

-Ilaa iyo imisa xayawaan oo kala nooc-nooc ah ayaa Ilaah abuuray?

-Noocyada xayawaanka Ilaah abuuray lama xisaabi karo.

-Waa kuma kan keliya ee xayawaanka abuuri kara?

-Ilaah oo keliya.
-Ilaah oo keliya ayaa xayawaanka abuuri kara.

-Markii Ilaah dhammeeyey uumista xayawaanka, ayaa dhulka diyaargarayskiisii dhammaaday.

-Miyaa Ilaah u diyaariyey malaa'igaha dunidan mise wuxuu u diyaariyey Shayddaanka iyo jinniyadiisa?
-Maya.

-Yuu Ilaah u diyaariyey dhulka?
-Ilaah wuxuu u diyaariyey dhulka dadka.

-Ilaah wuxuu dhulka u dhulkii la kaamilay u diyaariyey dadka waayo Ilaah dadka aad iyo aad ayuu u jeclaa.

-Ilaah dhulka uma uusan diyaarin malaa'igo.
-Ilaah dhulka uma diyaarin jinniyada.



-Ilaah dhulka uma uusan samaynin Shayddaanka.

-Ilaah wuxuu dhulkan u diyaariyey dadka oo keliya.

-Bal aynu idiin akhrinno waxa Ilaah leeyahay kaddib markii uu dhammeeyey diyaargarayntii dhulka ee uu dadka u diyaarinayey.

Bal anyu akhrinno Bilowgii 1:26

26-Ilaahna wuxuu yidhi, “Aan nin inoo eg ka samayno araggeenna, oo iyagu ha xukumeen kalluunka badda, iyo haadda hawada, yo xoolaha, iyo dhulka oo dhan, iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan.”

-Ilaah wuxuu yiri, “Bal aynu nin inoo eg ka samayno araggeenna.”

-Marka ay sidaas tahay waa kuma Ilaaha hadlaya?

-Ilaaha Aabbaha ah, iyo Wiilka Ilaah, iyo Ruuxa Qoduuska ah waa mid, oo oo lama kala sheego.

-Ilaaha Aabbaha ah, Wiilka Ilaah, iyo Ruuxa Qoduuska ah ee Ilaah waxay ka hadlayaa in nin u eg laga sameeyo araggooda.

-Wax waliba ee Ilaah abuuray, Yaa ugu muhiimsan ama ugu qiimi weyn?
-Dadka.

-Maaddaama dadka ay yihiin kuwa ugu ahmiyadda weyn leh ama ugu sarreeya ee Ilaah uumay, sidee buu Ilaah guddoonsaday inuu dadka u sameeyo.

-Ilaah wuxuu go'aansaday inuu dadka ka uumo araggiisa.

-Sidee baa Ilaah dadka uga duway xayawaanka?

-Ilaah wuxuu dadka ka abuuray aragga Ilaah, laakiin xayawaanka lagama abuurin aragga Ilaah.

-Maxay ka macne tahay in Ilaah ka abuuray dadka araggiisa?

-Looma jeedo jidhkeenna, waayo Ilaah ma leh jidh aadmi ah iyo lafo.

-Qaybaha aynu Ilaah kala midka nahay ee araggiisa waa qaybaha aan la arkaynin.

-Qaybaha aynu Ilaah kala midka nahay ee araggiisa laynagaga uumay waa Ruuxa.

-Ruuxeenna ama nafsaddeenna waa saddex qaybood.

-Nafsaddeenn, waxay ka kooban tahay, maankeenna, dareeenkeenna, iyo go'aammadeenna.

-Maankeenna, dareenkeenna, iyo go'aammadeenna waxaa laga sameeyey aragga Ilaah.

-Waa maxay qaybaha laga sameeyey aragga Ilaah?

-Maankeenna, dareenkeenna iyo go'aammadeenna.

-Ugu horraynta Ilaah wuxuu ka sameeyey maantkeenna Araggiisa.



-Waayo Ilaah wuxuu leeyahay, maan, wuxuuna dadka ku abuuray maan ama maskax.

-Ilaah wuu fikiri karaa, wuxuuna doonayaa in dadku ay fikiraan.

-Muxuu Ilaah inaga doonayaa inynu maankeenna ku samayno?

-Ilaah wuxuu doonayaa inaynu ka fikirno waxa wanaagsan.
-Ilaah wuxuu doonayaa inaynu isaga ka fikirno.

-Ilaah wuxuu doonayaa inay Isaga ka fikirno si aynu ku garanno isaga.

-Ma waxaad doonaysaa inaad baadiyaha la joogto xayawaanka oo aadan dadka la noolaan.
-Maya.

-Maxaadan u doonaynin?
-Waayo xayawaanku ma hadli karaan oo mana fakaraan.

-Isla sida aad saaxiibbadaa ula hadasho, ayaa Ilaah kaa doonayaa inaad Isagana ula hadasho.

-Ilaah wuxuu leeyahay maskax, wuxuuna dadka ku abuuray maskax ama maan.

-Ilaah wuxuu na siiyey Maan, si aynu isaga ku garanno.

-Tan labaad, Ilaah wuxuu dareenkeenna ka sameeyey araggiisa.

-Waayo, Ilaah wuxuu leeyahay dareen, Wuxuuna innaga inagu abuuray dareen.

-Ilaah wuu faraxsanaan karaa, oo wuxuu doonayaa in dadkiisuna faraxsanaadaan.

-Ilaah wuxuu doonayaa in dadkiisu ku faraxsanaadaan Ilaah.
-Ilaah wuxuu doonayaa in dadkiisu jeclaadaan Isaga.

-Ilaah wax wuu nacaa oo walaac dareemaa.

-Muxuu Ilaah neceb yahay?
-Ilaah wuxuu neceb yahay dembiga.

-Waa maxay dembiga?

-Dembiga waa wax aanu Ilaah doonayn.
-Dembigu waa wax waliba ee aanu Ilaah doonaynin.

-Maxaa Ilaah ka walaacaa?
-Ilaah wuxuu ka walaacaa dadka kuwaasoo aan Isaga jeclayn.

-Isla sida aad carruurtaada u jeceshahay, ayaa Ilaah kuu jecel yahay.

-Ilaah wuxuu leeyahay haddaba dareen, oo wuxuu dadkana ku abuuray Dareenkaas.

-Maxaa Ilaah dareenka inoo siiyey?
-Wuxuu inoo siiyey si Isaga aynu ku jeclaanno.

-Tan saddexaad, Ilaah wuxuu go'aammadeenna ka abuuray Araggiisa.

-Maxaa yeelay Ilaah wuxuu leeyahay go'aan, Wuxuuna dadka ku



abuuray go'aan ama doonis.

-Ilaah waxbuu dooran karaa, wuxuuna doonayaa in dadku yeesho doorasho ama go'aan.

-Maxaa Ilaah inaga doonayaa inynu go'aammadeenna ku samayno?

-Ilaah wuxuu inaga doonayaa inaynu go'aamadeenna ku dooranno waxa wanaagsan.

-Ilaah wuxuu doonayaa inaan Isaga dooranno ama guddoonsanno.

-Ilaah wuxuu doonayaa inaynu isaga dooranno si nolosheennu u wanaagsanaato.

-Markii aad qori riddo, miyaa qorigu dooranayaa waxa la tooganayo?
-Maya.

-Maxaa ugu wacan?
-Waxaa ugu wacan in qorigu uusan lahayn go'aan.

-Markii aad doonta ku wadayso biyaha, miyaa doonto go'aansanaysaa halka ay tegayso?
-Maya.

-Maxaa ugu wacan?
-Waxaa ugu wacan in doonnidu aanay lahayn go'aan.

-Ilaah wuxuu leeyahay go'aan, wuxuuna dadka ku abuuray go'aan.

-Ilaah wuxuu ina siiyey go'aan si aynu isaga ku dooranno.

-Bal aynu idiin akhrinno wax ku saabsan ninkii ugu horreeyey ee Ilaah uumay.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:27

27-Oo Ilaah nin buu ka abuuray araggiisa, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga; lab iyo dhaddig ayuu abuuray.

-Imisa qof ayuu Ilaah abuuray Bilowgii?
-Wuxuu abuuray hal nin iyo hal naag.

-Ugu horrayntiise, Ilaah wuxuu abuuray ninkii ugu horreeyey.

-Dabadeena, wuxuu Ilaah abuuray naagtii ugu horraysay.

-Muxuu ahaa magaca ninkii ugu horreeyey?
-Aadan.

-Waa kuma kan keliya ee abuuri karay Ninkii ugu horreyey iyo naagtii ugu horraysay?

-Ilaah oo keliya.
-Ilaah oo keliya ayaa dadka abuuri kara?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:7a

7-Rabbiga Ilaah ahuna nin buu ka sameeyey ciidda dhulka.

-Ilaah wuxuu ka abuuray Aadan ciidda dhulka.



-Laakiin, muxuusan Aadan imminka u noolayn?

-Waayo Ilaah wel neeftii nolosha kuma afuufin Aadan.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 2:7b

7-Dulalka sankiisana wuxuu kaga afuufay neeftii Nolosha; ninkiina wuxuu noqday naf nool.

-Aadan wuxuu noolaaday oo keliya markii Ilaah ku afuufay neeftii nolosha.

-Ilaah oo keliya ayaa ku afuufi kara dadka neeftii nolosha.
-Ilaah oo keliya ayaa nolohs abixin kara.

-Aadan wuxuu u horreeyey dadka oo dhan.
-Aadan wuxuu ahaa Aabbaha qabiilooyinka dunida oo dhan.

-Bilowgii, Ilaah ma abuurin nin cad iyo nin Madow.
-Bilowgii, Ilaah wuxuu abuuray oo keliya, hal nin iyo hal naag.

-Dadka oo dhan waxay ka  yimaadeen Aadan.
-Dadka oo dhan waxay ka soo farcameen Aadan.

-Kaddib markii Ilaah abuuray Aadan, Maxaa Ilaah Aadan madax uga dhigay ama ku wareejiyey?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:28

28-Oo Ilaah waa barakadeeyey iyaga; oo Ilaah wuxuu iyaga ku yidhi.  Wax badan dhala oo tarma, oo dhulka ka buuxsama.  Oo ka sara mara dhulka, oo xukuma kalluunka badda, iyo haadda

hawada, iyo wax kasta oo nool oo dhulka kor dhaqdhaqaaqa.

-Ilaah wuxuu Aadan madax uga dhigay dhulka oo dhan.

-Maxaa malaa'iguhu ayan madax uga noqonin dhulka?
-Waayo Ilaah dadka ayuu dunida madax uga dhigay.

-Maxaa jinniyadu ayan u ahayn madaxda dhulka?
-Waayo Ilaah dadka ayuu dunida madax uga dhigay.

-Kuma ayaa abuuray dhulka?
-Ilaah.

-Yaa dhulka iska leh?
-Ilaah.

-Yaa iska lahaa go'aankii ahaa in dadka dhulka madax looga dhigo?
-Ilaah oo keliya.

-Maxaa Ilaah yiri, markii uu soo dhammeeyey abuuristii oo dhan?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 1:31

31-Oo Ilaah wuxuu arkay wax kasta oo uu sameeyey, oo bal eeg, aad bay u wanaagsanaayeen. Waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii lixaad.

-Kaddib markii Ilaah dhammeeyey abuuristii dunida, ayaa Ilaah arkay in wax waliba wanaagsanaayeen.

-Waayo Ilaah waa Kaamil, wax waliba ee uu abuurayna waa



kaamil.

-Sidee bay dunidu ahayd bilowgii?

-Bilowgii, dhulku qodxan ma lahayn.
-Bilowgii, cagaar ama naq abuurla la soo dhasha ma lahayn.

-Bilowgii, xayawaanka dadka ma ayan qaniini jirin.
-Bilwogii, dadkuna shar ma ahayn.

-Bilowgii, Ilaah wax waliba si kaamil ah ayuu u abuuray.

-Waa kuma kan daawanayey markii Ilaah dunida si kaamil ah u abuuray?

-Malaa'igta Ilaah, Shayddaanka, iyo jinniyadiisa.

-Malaa'igta Rabbiga, waxay daawatay Ilaah oo wax waliba si kaamil ah u samaynaya.

-Wayna ku farxeen.

-Miyaa Shayddaanka iyo jinniyadiisu ay ku farxsanaayeen in Ilaah dunida si kaamil ah u abuuray?
-Maya.

-Shayddaanka iyo jinniyadiisu waxay arkeen in Ilaah wax waliba u sameeyey si kaamil ah, oo way caroodeen.